

**** Dugsiyo cusub oo la cusboonaysiiyay ee bulshooyinka Alberta ee sii kordhaya**

Maaso 11, 2024 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Dowladda Alberta waxay maalgalineysaa \$2.1 bilyan doolar muddo saddex sano ah si loo dhiso loona casriyeeyo dugsiyada ardayda Alberta oo dhan.

Sida gobolku u sii korayo, dawladda Alberta waxay maalgalinaysaa dugsiyo cusub iyo goobo arday si ay u daboolaan koritaankaas oo ay u siiyaan meelaha waxbarasho ee ardaydu u baahan yihiin iney guul la gaaraan. Haddii la ansixiyo, Miisaaniyadda 2024 waxay horumarinaysaa 43 mashruuc oo dugsi oo mudnaan leh, oo ay ku jiraan 28 dugsiyo cusub, 10 dugsiyo beddel ah iyo shan casriyeyn. Marka la dhammeeyo, mashaariicdani waxay abuuri doonaan ilaa 35,000 boosas cusub oo la casriyeeyay si ay ardayda Alberta wax u bartaan, u koraan, oo ay ula kulmaan awoodooda buuxda.

"Alberta way sii weynaaneysaa, waxaana si weyn u maalgelineynaa waxbarashada si aan u daboolno koritaankaas. Bulshooyinka gobolka oo dhan ayaa arki doona dugsiyo cusub oo la casriyeeyay oo ay ardaydoodu dhigtaan, taasoo siinaysa meelaha ugu wanaagsan ee ay wax ku baran karaan. Waxaan rajeynayaa inaan arko dhammaan dugsiyada aan maalgelineyno si ay horay ugu socdaan oo furaan sanadaha soo socda."

Danielle Smith, Gudoomiyaha

Iyada oo 43 mashruuc oo dheeraad ah lagu daray miisaaniyadda sanadkan, dawladdu waxay maalgelinaysaa wadar ahaan 98 mashruuc oo dugsi oo heerar kala duwan ah oo ka socda gobolka.

Iyada oo qayb ka ah \$2.1 bilyan doolar maalgelinta raasumaalka ah ee saddexda sano ah, \$103 milyan doolar muddo saddex sano ah ayaa loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo fasallo horumarsan ah si dhaqso loogu kordhiyo boosaska fasalka ee dugsiyada ay wajahayaan caqabado la taaban karo. Dugsiyada kulliyadaha iyo dugsiyada gaarka ah ee dadweynaha

waxaa lagu taageeri doonaa ballan qaad dhan \$123 milyan doolar muddo saddex sano ah, iyadoo dowladda Alberta ay sii waddo ballaarinta waxbarashada xirfadda oo ay taageerto tiro dhammaystiran oo doorashooyin dugsi oo ardayda iyo qoysaska ah.

Faa'iidada Alberta waa soo laabatay oo kor u kacday, dadka Kanada oo dhan iyo adduunka oo dhan ayaa mar kale ku qulqulaya gobolkayaga cajiibka ah, oo ay ku jirto Kaalgary. Miisaaniyadda 2024 ayaa dejisay qorshe hami leh oo lagu dhisayo 17 dugsi oo cusub iyo hal casriyeyn oo loogu talagalay Aagga Magaaloweynta Calgary, dhawrka sano ee soo socda. Dugsiyadan cusub waxa ay boos u abuuri doonaan 16,000 oo arday oo kale oo lix mashruuc laga bilaabay dhismaha sanadkan oo kaliya, 12ka mashruuc ee harayna waxa ay bilaabi doonaan sanadaha soo socda".

Demetrios Nicolaides, Wasiirka Waxbarashada

"Alberta way sii koreysaa oo Miisaaniyadda 2024 ee Qorshaha raasumaalka waxay taageereysaa kumanaan boosas arday oo cusub. Dowladda Alberta waxay hubinaysaa ardayda K-12 inay sii wadaan inay koraan oo ay guuleystaan."

Nate Horner, Wasiirka Khasnada iyo Maaliyadda

"Xukuumaddeenu waxay ka caawinaysaa ardayda inay si habsami leh u soo baxaan, mashaariicda raasumaalka ah ee lagu daray Miisaaniyadda 2024-ka ayaa sii wada jihadaas. In ka badan 12 dugsi ayaa sanadkan la soo geba gebeyn doonaa, waxaana rajeyneynaa inaan aragno arday si kooban u buuxsamaya hoolalka. Dugsiyada Alberta waxaa loo dhisay inay socdaan 75 sano, taas oo hubinaysa in carruurta ay ka faa'iidayaan doonaan maalgelinteenaa jiilasha soo socda."

Pete Guthrie, Wasiirka Kaabayaasha Dhaqaalaha

Calgary iyo Edmonton, oo ay weheliyaan bulshooyinka ku xeeran, ayaa si gaar ah u arkayay koboca ardayda oo xooggan iyo Miisaaniyadda 2024 waxay aqoonsanaysaa in iyadoo la kala hormarinayo 18 mashruuc oo dugsi oo ku yaal Calgary iyo agagaarka iyo 14 mashruuc oo dugsi oo ku yaal Gobolka Caasimada. Mashaariicda cusub ee dugsiyada ee goboladan waxay ka dhigan tahay 16,000 boosas dheeraad ah oo loogu talagalay ardayda gobolka Calgary, iyo 12,500 oo dheeraad ah oo ku yaala gobolka Edmonton.

Miisaaniyadda 2024 waa qorshe mas'uuliyad ku saleysantahay ah si loo xoojiyo daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada, loona dhiso bulshooyin badbaado leh oo taageero leh, loo

maareeyo kheyraadka gobolka si xikmad leh oo kor loogu qaado shaqo abuurka si loo sii wado dhismaha faa'iidada tartanka Alberta.

Xaqiiqooyinka degdega ah

- Oggolaanshaha maalgelinta buuxda/dhismaha waxa ku jira dhammaan hawlaha lagu qaadayo mashruuca dhamaystirka, oo ay ku jiraan dhismaha iyo dib u eegista degitaanka kadib.
- Dhaqdhaqaaqyada maalgelinta naqshadeynta waxaa ka mid ah diyaarinta dukumeentiyada qandaraaska dhismaha sida sawirro iyo tilmaamo.
- Hawlaha maalgelinta qorsheynta waxaa ka mid ah falanqaynta goobta iyo hawlaha horumarinta baaxadda.

** LA cusboonaysiiyay: Mashaariicda Dugsiga ee Miisaaniyadda 2024 - Maalgelin/Dhisme Buuxa (19):

Deegaanka		
Chestermere	Dugsiga Katooliga Degaanka Kaalgari	Dugsi cusub K-9
Cochrane	Dugsiyada Rocky View	Dugsi usub K-8
Edmonton	Dugsiyada Katooliga Edmonton	Dugsi cusub K-9 ku yaala Crystallina Nera
Edmonton	Dugsiyada Katooliga Edmonton	Dugsi cusub K-9 ku yaala Heritage Valley Cavanagh
Edmonton	Dugsiyada Katooliga Edmonton	Dugsi cusub K-9 ku yaala Hays Ridge
Edmonton	Dugsiyada Katooliga Edmonton	xalin ku yaala Rundle (K-9)
Edmonton	Dugsiyada Dadweynaha Edmonton	Dugsi cusub 7-12 ku yaala Glenridding Heights
Leduc	Dugsiyada Qeybta Black Gold	Dib loo cusbooneysiisay ee École Corinthia Park (K-6)

Miisaaniyadda 2024 maalgelinta naqshadeynta mashaariicda dugsiga:

Deegaanka	Qeybta Dugdiga	Nooca mashruuca/magaca
Airdrie	Dugsiyada Rocky View	Dugsi cusub 9-12
Kaalgari	Golaha waxbarashada Kaalgari	Dugsi cusub 10-12 ku yaala Cornerstone
Kaalgari	Golaha waxbarashada Kaalgari	Dugsi cusub K-4 ku yaala Redstone

Kaalgari	Golaha waxbarashada Kaalgari	Dugsiga dib loo cusbooneysiyeey ee Annie Gale (6-9)
Kaalgari	Dugsiga Katooliga Degaanka Kaalgari	Dugsi cusub K-6 ku yaala Redstone
Kaalgari	Dugsiga Katooliga Degaanka Kaalgari	Dugsi cusub 10-12 ku yaala west Kaalgari
Kaalgari	Conseil scolaire FrancoSud	Dugsi cusub K- 6 ku yaala Waqooyiga Kaalgari
Chestermere	Dugsiyada Rocky View	Dugsi cusub K-9
Edmonton	Dugsiyada Katooliga Edmonton	Dugsi cusub K-9 ku yaala Laurel
Edmonton	Dugsiyada Katooliga Edmonton	Dugsi cusub K-9 ku yaala River's Edge
Edmonton	Dugsiyada Dadweynaha Edmonton	Dugsi cusub K-6 ku yaala Glenridding Heights
Edmonton	Dugsiyada Dadweynaha Edmonton	Dugsi cusub K-6 school ku yaala Rosenthal
Edmonton	Dugsiyada Dadweynaha Edmonton	Dugsi cusub 7-9 ku yaala McConachie
Okotoks	Dugsiga Qeybta Foothills	Dugsi cusub 10-12

Miisaaniyadda 2024 maalgelinta qorsheynta mashaariicda dugsiga:

Deegaanka	Qeybta Dugdiga	Nooca mashruuca/magaca
Kaalgari	Golaha waxbarashada Kaalgari	Dugsi cusub 5-9 ku yaala Saddle Ridge
Kaalgari	Conseil scolaire FrancoSud	Dugsi cusub 9-12 ku yaala Waqooyiga Kaalgari
Kaalgari	Conseil scolaire FrancoSud	Dugsi cusub K-6 ku yaala Waqooyiga Kaalgari
Edmonton	Dugsiyada Dadweynaha Edmonton	Dugsiga labedeley ee Delton (K-6)
Edmonton	Dugsiyada Dadweynaha Edmonton	Dugsiga labedeley ee Spruce Avenue (7-9)
Edmonton	Conseil scolaire Centre-Nord	Dugsi cusub 7-12 dadweyne/Katoolig

Xogaha la xiriirra

- Miisaaniyadda 2024 ee Qorshaha Caasimadda ([Budget 2024 Capital Plan](#))
- Miisaaniyadda 2024 dulmar ([Budget 2024 overview](#))

Warbaahinta kaladuwan

- Daawo wararka shirarka ([Watch the news conference](#))
- Dhageyso wararka shirarka ([Listen to the news conference](#))